# Ketones –Maxay sameeyaan?

Calaamadaha ugu horreeya ee soo baxa waxaa lala xiriiriyaa sokorta dhiigga oo sarreysa, sida harraad, daal iyo kaadida oo korodha. Markaas ka dib, waxaa yimaada calaamado muujinaya sameysanka ketones, badanaa lallabo iyo mantag.

Lallabbo iyo/ama mantag ku dhaca qofka macaanka qaba waa calaamadaha ketones ilaa la caddeeyo in ay wax kale yihiin! Wax taas ka soo horjeeda waxaa ayaa la caddeeyay haddii baarista dhiigga ama baarista kaadida ee ketones ay wax kale sheegaan.

Mar walba koontarool ketones-ka:

- Haddii uu infekshin yimaado
- Haddii ay sokorta dhiiggu dhawr saacadood ka sarreysay 14 mmol/l, in kastoo aad dhawr jeer qaadatay insuliin.
- Haddii uu yimaado cudur degdeg ah, tusaale ahaan hargab wata feebaro
- Haddii ay yimaadaan calaamado cudur oo degdeg ah sida lallabbo, mantag iyo/ama calool xanuun.

Qof kasta lagu daweeyey insuliin ee dareema caafimaad darro iyo/ama mantag laakiin aan awoodin in uu saacad gudaheed cabbiro ketones waa in uu isla markiiba aadaa rugta qaabilaadda ee xaaladaha degdegga ah si baaritaan loogu sameeyo.

**Ketones + sokorta dhiigga oo kacsan= insuliin yaro**

**Ketones + sokorta dhiigga oo dhacsan= cunto yari (kaarboonhaydrayt)**



www.sahlgrenska.se
Drottning Silvias barnsjukhus
Diabetesmottagning
ADRESS Vitaminvägen 21,416 85 Göteborg
Telefon 031-343 4539

**Qorshe tallaabo qaadid ah:**

**Ketones-ka dhiigga oo ka yar 0,6 mmol/l**

Ma jiraan wax la sheego oo insuliin yari ah

**1**. Hubi sokorta dhiigga labadii saacadoodba mar..
**2**. Sax qiyaasta insuliinka labadii saacadoodba mar haddii ay sonorta dhiigu ka sarreyso 8mmol/l haddii ay sokorta dhiigu ka hooseyso 5mmol/l sii kaarboonhaydrayt dheeraad ah.

**Ketones-ka dhiigga 0,6-1,5 mmol/l**

Wuxuu sheegayaa insuliin yari aad u adag

**1**. Qalinka insuliinka ama cirbad hal mar la isticmaalo ku sii insuliin dheeri ah
**Ge 0,1 E/kg (tus. Miisaanka jirka=70 kg → ge 7 E, miisaanka jirka=35 kg → 3,5 E).**
**2**. Cab wax macaan, sida macaan yar oo la qasay (maaha casiirka!) light-ka.
**3.** Sii wad cabbiridda sokorta dhiigga iyo ketones-ka dhiigga ilaa ketonesku ay ka hoosmaraan 0.6 mmol / l laba jeer oo isku xig-xigta, sonkortuna ay ka hooseyso 10 mmol / l
**4.** Haddii aad leedahay cirbadda bambeynta ee, i-port ama insuflon, geli mid cusub, laakiin maaha ilaa insuliinta loo siiyo si waafaqsan sida kor ku xusan.

**Ketones-ka dhiigga 1,5-3 mmol/l**

Insuliin yaraan aad khatar u ah. Khatar ku aaddan ketoacidos (”ogsijiin sumoobid”).

**1.** Qalinka insuliinka ama cirbad hal mar la isticmaalo ku sii insuliin dheeri ah
**Ge 0,1 E/kg (tus. Miisaanka jirka =70 kg → ge 7 E, miisaanka jirka =35 kg → 3,5 E).**
**2**. Cab wax macaan, sida macaan yar oo la qasay (maaha casiirka!) light-ka.
**3**. Sii wad cabbiridda sokorta dhiigga iyo ketones-ka dhiigga ilaa ketonesku ay ka hoosmaraan 0.6 mmol / l laba jeer oo isku xig-xigta, sonkortuna ay ka hooseyso 10 mmol / l.
**4**. Haddii aad leedahay cirbadda bambeynta ee, i-port ama insuflon, geli mid cusub, laakiin maaha ilaa insuliinta loo siiyo si waafaqsan sida kor ku xusan.
**5**. Waqtiga maalintii ah: Kala xiriir rugta qaabilaadda ee dadka sokorta qaba 031-343 4539
**6.** Fiidadkii iyo fasxyada: Haddii 4 saac gudahood aysan xaaladdu xallismin amaba ay ka sii darto waa inaad aaddaa rugta qaabilaadda ee xaaladah degdegga ah.

**Ketones-ka ka sarreeya 3 mmol/l**

Insuliin yaraan aad khatar u ah. Khatarta ku aaddan ketoacidos (”ogsijiin sumoobid”) waa ay weyntahay. Xaaladdu waxay si degdeg ah u noqon kartaa mid nolosha khatar gelisa.
**1**. Qalinka insuliinka ama cirbad hal mar la isticmaalo ku sii insuliin dheeri ah.
**Ge 0,1 E/kg (tus. Miisaanka jirka =70 kg → ge 7 E, miisaanka jirka =35 kg → 3,5 E).**
**2.** Aad rugta qaabilaadda ee xaaladaha degdegga ah.


www.sahlgrenska.se
Drottning Silvias barnsjukhus
Diabetesmottagning
ADRESS Vitaminvägen 21,416 85 Göteborg
Telefon 031-343 4539